

Kordhinta Mushaarka ugu Yar

Dhammaan shaqaalaha Kanada ee lagu dhaqo sharciga federaalka iyo kuwa hoos yimaada sharciga shaqaalaha Ontario wuxuu mushaarkooda ugu hooseeya noqonayaa ugu yaraan saacaddii \$15.50.

Ontario mushaarka la bixinayo waa \$15.50

Waa in la lagu siiyaa saacad kasta oo aad shaqeyso mushaarka ugu yar. Shaqaalaha qaarkood, sida kuwa beeraha, waxay laayihiin xeerar gaar ah ee mushaarka ugu yar. Na soo wac si aad u ogaato in shaqadaada lagu dabbaqayo mushaarka ugu yar ama haddii aad tabaneyso in aan lagu siinin mushaarka ugu yar ee saxda ah.

Shaqaalaha khamrada waxay qaadan jireen mushaar ka yar midka guud ee mushaarka ugu yar. Hase yeeshee Janwari 1, 2022, Shaqaalaha khamrada waxay qaadan doonaan mushaarka guud ee ugu yar.

	Mushaarka Guud ee ugu yar	Ardayda da'dooda ka yar tahay 18 sano
Oktoobar 1, 2022	\$15.50	\$14.60
Oktoobar 1, 2023	\$16.55	\$15.60

Mushaarka ugu hooseeya ee federaalka waa \$16.65

Laga bilaabo April 1, 2023, shaqaalaha lagu dhaqo sharciga federaalka wuxuu mushaarkooda ugu hooseeya noqonayaa \$16.65 saacaddii. Diseember 29, 2021, mushaarka ugu hooseeya ee federaalka waxay isku mid noqdeen mushaarka ugu hooseeya ee gobollada oo idil iyo dhulalka ay deggen yihiin dadka asaliga ah.



Shaqaalaha ka shaqeeya bangiyada, war baahinta, is gaarsiinta iyo kuwa xamuulka ee gobollada iyo caalamka (international), kuwa hay'adaha Taajka iyo adeegyada la xiriira shacabka asaliga ah (First Nations) waxay hoos imaanayaan Sharciga Shaqaalaha Kanada. Tirada shaqaalahaas waxay gaarayaan ilaa iyo hal malyan.

Shakhsi ahaan is ilaali

- Haddii madaxdaadu ay ku siiyaan lacag ka hooseeysa mushaarka ugu yar, ku hayso gurigaada diiwaan ku saabsan taariikhda, saacadaha shaqo iyo lacagta lagu siiyay.
- Madaxdaadu, ma waxay qof kasta siiyaan mushaar ka hooseeya mushaarka ugu yar? La xiriir dadka aad kalsooni ku qabto, ka dibna annaga nala soo kulama si aan uga doodno habka loo hagaajin karo mushaarka iyo xaaladaha shaqada.
- Marka mushaarka ugu yar uu sare u kaco, loo shaqeeyeyaasha qaarkood waxay shaqaalaha ka jaraan faa'idoonka (benefits), saacadaha, tibta ama waxay shaqaalaha ku amraan in ay bixiyaan waxyaabo aysan horay u bixin jirin. Tani caddaalad ma aha Haddii ay tani ka dhacdo goobta shaqada, na soo wac si aan kuu cawinno.

Updated April 2023